WE ARE Valley
MEDICAL CENTER & CLINICS

# Xeerarka iyo Habraacyada Maamulka

## XEERKA KAALMADA

### DHAQAALAHA

Xeerkaan Kaalmada dhaqaalaha waxaa loogu talo galay xaqiijinta in bukaanadeena ku siman ama qarka u saaran heerka fakhriga ee federaalka ay helaan adeegyada caafimaadka ee ku haboon ee isbitaalka ku saleysan iyo/ama adeegyada ku haboon ee aan ku saleysnayn isbitaalka si bilaash ah kuwaas oo lagu saleeyay awoodooda bixinta qarashka adeegyada oo dhan ayna ku jirto daryeel bilaash ah. Ayadoo aan loo eegayn caymiska (Medicare, Medicaid, Apple Health, Children's Health Insurance Program, iwm.), Valley Medical Center & Clinics ma takoorto marka ay bixinayso kaalmada dhaqaalaha. Kaalmada dhaqaalaha ayaa la siin doonaa dhammaan shaqsiyaadka u qalama ayadoo aan loo eegayn da'da, isirka, midabka, diinta, jinsiga, dookha galmada, ama wadanka qofku kasoo jeedo sida ku cad Cutubka 246- 453 WAC iyo Cutubka 70.170 RCW.

### HELITAANKA XEERKA

Ogeysiis u sheegaaya bukaannada in Valley Medical Center & Clinics ay bixiso kaalmo dhaqaale ayaa lagu soo dhajin doonaa aagaga muhiimka ah ee isbitaalka, ayna ku jiraan, Isbitaal dhigista, Tallo Bixin Dhaqaale, Waaxda Xaalada Degdega ah, iyo Diiwaan Gelinta Bukaan Socodka kuwaas oo dadwaynaha u sheegaaya Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha.

U qalmidda kaalmada dhaqaalaha ayaa ka doonaysa bukaannada inay buuxiyaan dhammaan shuruudaha iyo filashooyinka sida lagu qeexay Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha. Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha, khulaasadiisa luuqada fudud, codsiga, iyo xeerka biilka iyo dayn uruurinta ee Kaalmada Dhaqaalaha ayaa lagu heli karaa luuqad kasta oo tiro kayar shan boqolkiiba dadwaynaha ama 1,000 oo qof oo ku nool aaga gaarka ah ee adeegga isbitaalka. Waxaa intaas dheer, adeegyada turjumaanka ayaa loo fidin doonaa bukaannada kale ee aan ku hadlin Ingiriiska ama aqoontooda Ingiriisku kooban tahay kuwaas oo aan akhrin karin xogta codsiga ee qoran. Nuqullada ayaa looga heli karaa si bilaash ah webseedka Valley Medical Center iyo marka la codsado.

### QEEXITAANNADA

**Kaalmada Dhaqaalaha**: Daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah ee la siiyay dadka asaliyiinta ah marka caymiska dhinaca sadexaad, haddii uu jiro, uu dhamaaday, ilaa heer shaqsiyaadku aysan awoodin inay bixiyaan daryeelka ama ay bixiyaan qaybaha caymisku jarto ama qaybta caymisku ka doonaayo oo uu doonaayo qarash bixiyaha sadexaad ee shuruudaha xeerkaan.

**Dadka Asaliyiinta ah**: Bukaannada ama damiinadooda u qalma kaalmada dhaqaalaha ee xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha oo lagu saleeyay heerka fakhriga ee federaalka, tirada qoyska, iyo kuwaas oo waayay caymis kasta oo dinaca sadexaad.

**Caymiska Dhinac Sadexaad**: Masuuliyad saaran dhanka shirkada caymiska, qandaraaslaha adeegyada daryeelka caafimaadka, ururka faya dhawrka caafimaadka, qorshaha caafimaadka ee kooxda, barnaamijka dawlada (Medicare, Medicaid ama medical assistance, magdhawga shaqaalaha, dheefaha hawlgabka ciidanka), ama dheefaha caafimaadka qabiilka si loo bixiyo daryeelka bukaannada la doobaayo iyo adeegyada, waxaana ku jiri kara heshiisyada, xukunnada, ama abaal marinnada sida dhabta ah loo helay ee la xiriira falalka dayaca ah ee dhinacyada kale (tusaale, shilalka baabuurta ama dhaawacyada shaqsiga ah) kuwaas oo keenay xaalada caafimaadka ee bukaanku u helaayo adeegyada daryeelka. Valley Medical Center ayaa qiimeyn doonta caymisyada kale (tusaale, wasaarada caafimaadka) si lacagta loogu soo mago hadba kiiska markaas taagan.

**Adeegyada Caafimaadka ee Haboon ee Isbitaalka Lagu Baxsho**: Waa adeegyada isbitaalka Valley Medical Center & Clinics kuwaas oo si macquul ah loo xisaabshay si loo baaro, loo saxo, loo daweeyo, loo hagaajiyo, ama looga hortago xaaladaha kasii daraaya ee khatarta gelinaaya nolosha, ama u keenaaya waxyeelo ama xanuun, ama keenaaya xanuun ama cilad, ama abuuraaya khatar keenaysa ama uga sii daraysa naafada, ama keenaaya naafo jireed ama hawlgab, uusana jirin qaab kale oo isla tayadaas leh, oo ka qiimo jaban oo daawayn ah oo la heli karo ama ku haboon qofka adeegga codsanaaya. Hanaanka daawaynta waxaa ku jiri kara kormeerka keliya ama, marka ay haboon tahay, kuma jirto wax daawayn ah. Adeegyada haboon ee isbitaalka ku saleysan kuma jiraan daryeel lagu baxsho rugaha caafimaadka ee iskood u shaqeeya/xafiisyada dhakhtarka ee Place of Service 11 xataa haddii ay xiriir la leeyihiin Valley Medical Center & Clinics.

**Adeegyada Caafimaadka ee Haboon ee aan Isbitaalka ku Saleysnayn**: Waa adeegyada lagu baxsho rugaha caafimaadka iskood ah/xafiisyada dhakhtarka ee Valley Medical Center & Clinics kuwaas oo si macquul ah loo xisaabshay si loo baaro, loo saxo, loo daweeyo, loo hagaajiyo, ama looga hortago xaaladaha kasii daraaya ee khatarta gelinaaya nolosha, ama u keenaaya waxyeelo ama xanuun, ama keenaaya xanuun ama cilad, ama abuuraaya khatar keenaysa ama uga sii daraysa naafada, ama keenaaya naafo jireed ama hawlgab, uusana jirin qaab kale oo isla tayadaas leh, oo ka qiimo jaban oo daawayn ah oo la heli karo ama ku haboon qofka adeegga codsanaaya. Hanaanka daawaynta waxaa ku jiri kara kormeerka keliya ama, marka ay haboon tahay, kuma jirto wax daawayn ah. Ujeedada Xeerkaan Kaalmada Dhaqaalaha, adeegyada daryeelka kahortaga ah ayaa loo arki karaa "adeegyada ku haboon caafimaadka ee aan isbitaalka lagu bixin".

**Xaalada Caafimaad eee Degdega ah**: Waa xaalad caafimaad oo lagu garan karo astaamaha darnaanta ku filan leh, ayna ku jirto xanuun daran, taas oo haddii aan si dhakhso ah loo daawayn la filaayo inay si macquul ah u abuurto:

1. Gelitanka caafimaadka qofka (ama, marka laga hadlaayo bukaan uur leh, caafimaadka bukaanka ama ilmaha uurka ku jira) khatar aad u daran.
2. Naafonimo xun oo ku dhacda xubnaha jidhka.
3. Carqalad xun oo ku dhacda xubin ama qayb kamid ah jidhka.

Marka laga hadlaayo bukaan uur leh oo fooshii hayso shuruudaha ayaa ka dhignaan doona:

1. In uusan jirin wakhti ku filan oo qofka lagu geeyo isbitaal kale kahor inta aysan umulin; ama
2. In wareejintu khatar gelin karto caafimaadka iyo badqabka bukaanka ama ilmaha uurka ku jira.

**Place of Service 11**: Marka laga hadlaayo ujeedooyinka xeerkaan, weedhaan waxaa loola jeedaa dhammaan goobaha Daryeelka Aasaasiga ah ee Valley Medical Center & Clinics iyo rug kasta oo kale oo caafimaad oo madax banaan ama xarunta xafiiska dhakhtarka ee isbitaalka ka baxsan kaas oo xirfadlaha caafimaad oo ku bixiyo adeegyada uuna u qaado qarashka xirfadiisa.

**Dhakhaatiirta Xubnaha ka ah Valley Medical Center & Clinics:** Marka laga hadlaayo ujeedooyinka xeerkaan, dhakhtar ama xirfadle kale oo caafimaad oo u qalma kaas oo heshiis shaqeynaaya kula jira Valley Medical Center & Clinics Physicians ama haddii kale u wakiishay adeegyadiisa Valley Medical Center & Clinics Physicians asagoo heshiis qandaraas la saxiixday kuna bixiya adeegyada xarumaha shaqada ee ay u ogolaatay Valley Medical Center.

**SHURUUDAHA U QALMIDDA**

Shaqsiyaadka doonaaya Kaalmada Dhaqaalaha waa in ay buuxiyaan shuruudaha u qalmidda ayna buuxiyaan hanaanka codsiga, sida halkaan lagu qeexay.

Heerka Adeegyada

U qalmidda Kaalmaatiga Dhaqaalaha ayaa u baahan in adeegyada caafimaadka ee lagama maarmaanka ah ee la codsanaayo ay yihiin adeegyada ku haboon ee isbitaalka ku saleysan, kuwaas oo ay kasoo horjeedaan adeegyada baaritaanka, ikhtiyaariga ah, ama tijaabada ah nooc ahaan. Shardi dhaafyada shuruudaha heerka adeegyada ee lagu qeexay farqadaan ayaa keliya la bixin karaa marka ay jiraan xaaladaha kheyru caadiga ah iyo marka uu ansixiyo Madaxa Maamulka Dhaqaalaha ee Valley Medical Center & Clinics ama wakiilkiisu. Inkasta oo uusan qasab ka dhigayn sharciga federaalka ama gobalku, u qalmidda kaalmada dhaqaalaha ayaa la gaarsiin doonaa shaqsiyaadka helaaya adeegyada caafimaadka ee aan isbitaalka lagu bixin oo dhamaystiran shuruudaha u qalmidda ee kore ee ku qoran xeerkaan.

Caymiska Dhinaca Sadexaad

Caawimaada dhaqaalaha ayaa caadiyan ah xalka kama danbaysta ah kadib marka la isticmaalo dhammaan ilaha caymiska qoloda sadexaad ee bukaanku heli karo. Tan waxaa ku jira:

1. Qorsheyaasha kooxda ama shaqsiga ee caafimaadka.
2. Barnaamijyada magdhawga ee shaqaalaha.
3. Medicare, Medicaid, barnaamijyada kale ee kaalmada caafimaadka.
4. Barnaamijyada kale ee gobalka, federaalka ama milatariga.
5. Xaaladaha qaanta dhinaca sadexaad. (tusaale: shilalka gaariyaasha ama dhaawacyada gaarka ah).
6. Dheefaha caafimaadka ee qabiilka.
7. Xaaladaha kale ee qof kale ama wakaalad ay masuuliyad sharci uga saarnaan karto bixinta qarashaadka adeegyada caafimaadka.

Bukaannada aan raacayn si ay u helaan caymiska caafimaadka ee laga yaabo inay helayaan kaas oo ay haddii kale u qalmi lahaayeen (tusaale, Medicaid, Apple Health) ayaa si gaar ah loo qiimeyn doonaa si loo sameeyo caawimaad dhaqaale.

Kahor inta aan loo tixgelin caawimaad dhaqaale u qalmidda bukaanka/damiinka ee lacagta caymiska dhinaca sadexaad ayaa la qiimeyn doonaa, bukaanka/damaanad-qaadaha ayaana laga yaabaa in looga baahdo inuu codsado caymiska hoos yimaada barnaamijyada ay xaq u leeyihiin. Bukaannada ku fashilma ku dhaqanka shuruudaha codsiga kaalmada dhaqaale ayaa loo diidi karaa kaalmada dhaqaalaha. Valley Medical Center & Clinics ayaa dooran karta in aysan siin kaalmada dhaqaalaha bukaan/damaanad-qaade kasta oo u qalma dheefaha horgalka ah ee Medicaid-ka gobalka Washington iyo/ama barnaamijyada kale ee Apple Health haddii bukaanka/damiinku uusan samayn dedaallada macquulka ah si uu ula shaqeeyo hanaanka codsiga ee Medicaid ama barnaamijyada kale ee Apple Health. Valley Medical Center & Clinics ayaan u diidi doonin kaalmada dhaqaalaha bukaan sabab la xiriirta keliya inay cuskatay diidmada bukaanka ee iska diiwaan gelinta qorshaha uu bukaanku ku helaayo Health Benefits Exchange.

Dakhliga

Sida ku cad sharciga iyo xeerka, shaqsiyaadka dakhligoodu ku kooban yahay tilmaamaha heerka fakhriga ee federaalka ayadoo lagu saleynaayo taariikhda adeegga ayaa u qalmi kara inay helaan caawimaad dhaqaale. Valley Medical Center & Clinics ayaa tixgelin doonta dhammaan ilaha dhaqaalaha si ay u xaqiijiso u qalmidda dakhliga ee kaalmada dhaqaalaha. Dakhliga waxaa ku jira dhammaan lacagta cadaanka ah ee la helay kahor inta aan canshuuraha laga jarin gunnooyinka iyo mushaaraadka, lacagaha faya dhawrka. Lacagaha Social Security; dheefaha shaqo joojinta; dheefaha shaqo la'aanta ama naafada; taageerada ilmaha; alimony; iyo lacagta xaasilka ah ee laga helo ganacsiga ama hawlaha maalgashiga ee la siiyay bukaanka/damiinka shaqsiga ah.

**CODSIGA**

Marka bukaan uu doonaayo inuu codsado kaalmo dhaqaale, bukaanku waa inuu buuxiyaa Foomka Xogta Dhaqaalaha ee Sirta ah (CFI) uuna keenaa dukumeentiyada muhiimka ah iyo kuwa macquulka ah ee kaabista ah si loo taageero xogta ku jirta Foomka CFI. Valley Medical Center & Clinics ayaa go'aan hore ka gaari doonta xaalada kaalmada dhaqaalaha ee bukaanka wakhtiga isbitaalla ka dhigo ama sida ugu dhakhsaha badan kadib marka adeegyada loo bilaabo bukaanka. Habraacyada codsiga kaalmada dhaqaalaha waa in aysan culays qayru macquul ah saarin bukaanka, ayadoo la tixgelinaayo caqabado kasta oo carqalad ku noqon karta awooda bukaanka ee ku dhaqanka habraacyada codsiga. Baaritaanka u qalmidda Medicaid-ka gobalka Washington ama dheefaha kaalmada dadwaynaha ayaa la isku dubaridi doonaa ayadoo la kaashanaayo Waaxda Adeegga Bukaanka; Maamulka Qorsheynta/Natiijooyinka Isbitaal ka Saaridda (haddii aan la gayn xarunta kalkaalinta) ama Adeegyada Dhaqaalaha ee Bukaanka. Valley Medical Center & Clinics ayaa ka caawin karta bukaannada gobalka ka baxsan iyo/ama damiinnada si ay u aqoonsadaan meesha laga codsanaayo barnaamijyada Medicaid iyo Exchange gudaha gobalkooda.

1. Mid kasta oo ka mid ah dukumeentiyada soo socda ayaa loo arki karaa cadeyn ku filan taas oo lagu saleynaayo go'aanka kama danbaysta ah ee u qalmidda kaalmada dhaqaalaha:
    a. Bayaanka haysashada “W-2”:
    b. Risiidyada mushaarka hadda (3 bilood);
    c. Bayaannada Bangiga (3 bilood);
    d. Canshuur celintii sanadkii lasoo dhaafay ee dakhliga, ayna ku jiraan jadwallada haddii ay jiraan;
    e. Bayaannada qoran, ee saxiixan ee kasoo baxay loo shaqeeyayaasha ama dadka kale (warqadda cadeynta) oo sheegaysa xaaladaada hadda ee dhaqaalaha iyo xaaladaha haddii aadan hayn cadeynta dakhliga;
    f. Foomamka ansixinaaya ama diidaaya u qalmidda Medicaid iyo/ama kaalmada caafimaadka gobalku maal geliyo;
    g. Foomamka ansixinaaya ama diidaaya magdhawga shaqo la'aanta; ama bayaannada qoran ee kasoo baxay shaqo bixiyaasha ama wakaaladaha faya dhawrka.
2. Waxaa intaas dheer, haddii uusan bukaanku awoodin inuu keeno wax kamid ah dukumeentiyada kor lagu sheegay, Valley Medical Center & Clinics ayaa ku tiirsanaan doonta bayaannada qoran ee saxiixan ee midkood dhinaca masuuliyada leh ama dhinac kale oo qeexaaya dakhliga codsadaha. Haddii midka dukumeentiyada hore aan la heli karin, Valley Medical Center ayaa gaari karta go'aan ayadoo ku saleysanaysa deeqda hore ee Valley Medical Center ee kaalmada dhaqaalaha ama lagu saleeyay sharaxaada hadalka ah.

3. Dhammaan xogta la xiriirta codsiga ayaa lagu hayn doonaa mid sir ah. Nuqullada dukumeentiyada taageeraaya codsiga ayaa lala hayn doonaa foomka codsiga kaalmada waxaana la hayn doonaa todobo sano

Valley Medical Center & Clinics ayaa meesha ka saari karta shuruudaha dakhliga, dukumeentiga, iyo xaqiijinta haddii u qalmidda Kaalmada Dhaqaalaha ay iska cadahay. Fikirka shaqaalaha Valley Medical Center & Clinics ayaa lagu dhaqmi doonaa marka ay jiraan xaalado sida arimaha bulshada ama caafimaadku ay jiraan. Marka ay sidaas dhacdo, Valley Medical Center ayaa cuskan doonta bayaannada qoran oo saxiixan ee kasoo baxay dhinaca masuuliyadda leh si loo gaaro go'aanka u qalmidda.

Valley Medical Center & Clinics ayaa u sheegi doonta shaqsiyaadka codsanaaya kaalmada dhaqaalaha go'aankeeda u qalmidda 14 maalmood gudahood kadib marka ay hesho codsiga buuxa iyo dukumiintiga taageeraaya. Ansixinta, codsashada macluumaad dheeraad ah ama diidmada kaalmada dhaqaalaha waxaa lagu soo saarayaa qoraal waana in lagu daraa tilmaamaha racfaan ka qaadashada ama dib u eegista. Haddii Valley Medical Center & Clinics ay diido kaalmada dhaqaalaha, Valley Medical Center & Clinics waa in ay u sheegtaa qofka codsanaaya aasaaska loo doortay diidmada. Haddii la diido bukaanka/damiinka ayaa u keeni kara dukumeenti dheeraad ah Valley Medical Center ama codsanaaya dib u eegis kadib 30 maalmood marka uu helo ogeysiiska diidmada. Haddii dib u eegistaan xaqiijiso diidmadii hore ee kaalmada dhaqaalaha, ogeysiiska qoran ayaa loo diri doona bukaanka/damiilka iyo Waaxda Caafimaadka si waafaqsan sharciga gobalka.

Valley Medical Center & Clinics Ma eegto hantida si ay u qiimeyso go'aaminta u qalmidda kaalmada dhaqaalaha. Valley Medical Center & Clinics ayaa tixgelin karta hantida oo uruurin karta xog ku saabsan hantida si loo go'aansho u qalmidda culayska dhaqaale la xiriirta.

**SHURUUDAHA DHAQAALAHA**

Marka dhinaca masuuliyada leh uu bixisho qayb, ama dhammaan qarashaadka la xiriira adeegyada caafimaadka ee haboon ee isbitaalka ku saleysan ama aan isbitaalka ku saleysnayn la bixiyay dhammaan lacagaha noocaas ah waa in loo celiyaa dhinaca masuulka ka ah 30 maalmood gudahood kadib go'aanka Valley Medical Center & Clinics ee la xiriira in bukaanku u qalmo kaalmada dhaqaalaha. Haddii kaalmada dhaqaalaha ee qaybta ah la ansixiyo, lacag celinnada ayaa la samayn doonaa kadib marka laga jaro lacagaha horey loogu lahaa bukaanka. Macluumaad dheeraad ah ayaa laga heli karaa xeerka Biilka iyo Dayn Uruurinnada ee isbitaalka khuseeya.

Dakhliga qoyska ee sanadlaha ah ee codsadaha ayaa la go'aamin doonaa marka adeegyada haboon ee isbitaalka ku saleysan ee caafimaadka ama adeegyada caafimaadka ee haboon ee aan isbitaalka ku saleysnayn la bixiyay, ama wakhtiga codsiga caawimaada dhaqaalaha haddii codsiga lasoo gudbiyay labo sano gudahood kadib adeegga, bukaanku uu samaynaayay dedaalo wanaagsan oo daacad ah si uu u baxsho qarashka adeegyada, bukaankuna uu muujiyo u qalmidda caawimaada dhaqaalaha. Faahfaahin dheeraad ah ayaa laga heli karaa Tilmaamaha Heerka Fakhriga ee Federaalka: [https://www.valleymed.org/patients--visitors/billing-and-insurance/financial-help--options/federal-poverty-guidelines](https://www.valleymed.org/patients--visitors/billing-and-insurance/financial-help--options/federal-poverty-guidelines)

Xarunta iyo/ama adeegyada xirfadda ee Valley Medical Center:

- 0% - 300% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 100% ee kaalmada dhaqaalaha.

Adeegyada xarunta ee keliya leh taariikhaha isbitaal ka saarida oo ku beegan ama kadib Luuliyo 1, 2022, laguna baxshay Valley Medical Center & Clinics:

- 301% - 350% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 75% ee kaalmada dhaqaalaha
- 351% - 400% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 50% ee kaalmada dhaqaalaha

**XADIDAADAHA QARASHAADKA**

Valley Medical Center & Clinics ayaa xadideysa cadadka laga qaadi karo xaalada degdega ah ama caafimaadka kale ee lagama maarmaanka ah ee la siiyay shaqsiyaadka u qalma kaalmada lagu baxsho Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ayadoo ka dhigaysa ugu badnaan cadadka caadiyan laga qaado (AGB) shaqsiyaadka haysta caymiska daboolaaya daryeelka noocaas ah kamana qaadi karo "qarashaadka guud" shaqsiyaadkaas. Eeg 26 USC §501(r)(5)(A) iyo (B). Ka eeg lifaaqa macluumaad dheeraad ah.

**HABRAACA**

**Dhinacyada Masuulka ka ah: Tallo bixinta Dhaqaalaha ama Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka**

**A. Tilmaamaha/Talaabooyinka**

Valley Medical Center & Clinics ayaa bixisa qiimeynta balaaran ee bukaanka iyo wacyi-gelinta kaalmada dhaqaalaha. Valley Medical Center & Clinics ayaa samayn doonta dadaal kasta si loo sameeyo go'aaminta caymiska dhinaca sadexaad ee daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah. Valley Medical Center & Clinics ayaa baari doonta in haddii bukaanka ama damiinkiisa uu buuxinaayo shuruudaha caymiska caafimaadka ee barnaamijyada kaalmada caafimaadka ee Cutubka 74.09 RCW ama Washington Health Benefit Exchange. Haddii macluumaadka ku qoran codsiga Kaalmada Dhaqaalaha ay muujiso in bukaanka ama damiinkiisu u qalmo caymiska, Valley Medical Center & Clinics ayaa ka caawin doonta bukaanka ama damiinkiisa codsashada. Waxaa intaas dheer, caawiyaal tababaran ayaa la heli karaa si ay uga caawiyaan:

- Su'aalaha guud
- Helitaanka adeegyada turjumaanka
- Washington state Medicaid, Medicare, iyo Washington state Health Benefit Exchange enrollment

Bukaannada/Damiinnada ayaa loo aqoonsadaa qiimeynt Kaalmada Dhaqaalaha ee qaybaha kala duwan sida adeegga kahor/mudeynta, inta lagu jiro booqashadooda/diiwaan gelinta, adeegga kadib/biilka.

Wacyi-gelinta Kaalmada Dhaqaalaha waxaa ku jira:

- Boor ayaa lagu soo dhajiyaa aagaga muhiimka ah ee isbitaalka, waaxda xaalada degdega ah iyo rugaha caafimaadka ayagoo ku qoran luuqadaha ay ku hadlaan in ka badan shan boqolkiiba (5%) dadwaynaha ama 1,000 qof oo ku nool aaga gaarka ah ee adeegga isbitaalka. Boorka onlaynka ah ayaa lagu bixiyaa aalada MyChart si ay bukaannadu mudeysi ugu sameeyaan qaab elektarooniga ah.
- Valley Medical Center & Clinics ayaa bixisa dukumeentiyada Kaalmada Dhaqaalaha oo laga heli karo: [valleymed.org/financialassistance](valleymed.org/financialassistance).
- Shaqaalaha ayaa loo tababaray inay ka hadlaan u qalmidda kaalmada dhaqaalaha ayna bukaannada ku xiraan taageerada,
- Valley Medical Center & Clinics ayaa abuurtay barnaamijka tababarka sanadlaha ah ee guud oo ku saabsan Xeerkeeda Kaalmada Dhaqaalaha iyo adeegsiga adeegyada tujumaanka si looga caawiyo dadka aan Ingiriiska aadka u aqoon iyo dadka aan Ingiriiska ku hadlin fahanka xogta ku saabsan Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha. Tababarkaan ayaa ku haboon shaqaalaha safka hore ee ka shaqeeya diiwaan gelinta, dad dhigista, waaxda xaalada degdega ah, iyo biilka, iyo shaqaale kasta oo kale oo ku haboon, si looga jawaabo su'aalaha la xiriira kaalmada dhaqaalaha si hufan, ay u helaan adeegyada turjumaanka ee muhiimka ah, ayna su'aalaha toos ugu diraan waaxda ku haboon wakhtiga loo baahan yahay.
- Xiriirada biilka bukaanka ayaa ku sheega xogta helitaanka kaalmada dhaqaalaha af-Ingiriis iyo Isbaanish (luuqada labaad ee loogu hadlida badan yahay).

Valley Medical Center & Clinics ayaan bilaabi doonin dadaallada dayn uruurin ilaa go'aanka koobaad ee xaalada u qalmidda kaalmada dhaqaalaha lasoo saaro. Marka ay Valley Medical Center & Clinics horey u go'aaisay in bukaanku uu u qalmi karo kaalmada dhaqaalaha, mid kasta iyo dhammaan talaabooyinka qayru caadiga ah ee dayn uruurinta (ayna ku jiraan talaabooyinka dacwada madaniga ah, mushaar jarashada, iyo ku wargelinta wakaaladaha daynta uruuriya ama soo sheega dadka daymaysan) ayaa joogsan doona ayadoo la sugaayo go'aanka u qalmidda kaalmada dhaqaalaha.

Hase yeeshee, sida lagu cadeeyay WAC 246-453-020 (5), fashilka bukaanka ama dhinaca masuulka ka ah ku fashilmo inuu si macquul ah u buuxiyo habraacyada codsiga Kaalmada dhaqaalaha ee xeerkaan ku cad ayaa noqon doona aasaas ku filan in Valley Medical Center & Clinics ay biloowdo dedaallada dayn uruurinta ee ka dhanka ah bukaanka. Si taas waafaqsan, ujeedooyinka xeerkaan marka la eegaayo, bukaan ama dhinaca masuuliyada leh ayaa ku fashilmay inuu si macquul ah ku buuxiyo habraacyada Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha marka bukaanka ama dhinaca masuuliyada leh uusan soo gudbin agabka codsiga 15 maalmood oo kuwa shaqada ah gudahood marka bukaanka ama dhinaca masuulka ah uu helay xogta. Dadaallo kasta oo dayn uruurin waa la joojin doonaa haddii bukaanka ama dhinaca masuulka ka ah uu dib u bilaabo hanaanka codsiga.

Xisaabaadka loo gudbiyay wakaalada dayn uruurinta oo xukunka ay ku riday nidaamka maxkamadu ayaan dib danbe ugu qalmin tixgelinta kaalmada dhaqaalaha. Bukaan ayaa codsan kara caawimaad dhaqaale xili kasta kahor inta aan xisaabta la marsiin xukun maxkamadeed.

WE ARE Valley
MEDICAL CENTER & CLINICS

**TAARIIKHAHA DIB U EEGISTA/WAX KA ABDELKA**:
3/2/2015, 3/23/2016, 4/18/2016, 10/2/2017, 10/1/2018, 5/29/2019, 1/1/2020, 1/12/2022, 07/01/2022, 02/15/2024, 06/17/2024, 10/01/2024 / 04/23/2025 / 08/01/2026

**LIFAAQA:**
Tilmaamaha Qarashka Caadiyan La Qaado (AGB)

# Lifaaqa
# Tilmaamaha Qarashka Caadiyan La Qaado (AGB)

Haddii aad caawimaad ku hesho Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Valley Medical Center, Valley Medical Center & Clinics ayaan kaa qaadi karan wax ka badan cadadka caadiyan laga qaado (AGB) dadka haysta caymiska daboolaaya isla adeegyada. IRS Qaybta 501(r)(5) ayaa ka doonaysa isbitaallada 501(c)(3) inay ku xadidaan cadadka laga qaadaayo shaqsiyaadka u qalma Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha heer ka hooseeya qarashaadka guud ee daryeelkaas. Bukaanka/damiinka u qalma kaalmada dhaqaalaha ayaa laga "qaadi" doonaa keliya qaybta bukaanku masuulka ka yahay ee qarashka, kadib marka dhammaan lacag dhimisyada iyo lacagaha caymiska lagu dabaqo (haddii ay jiraan).

Valley Medical Center & Clinics ayaa go'aamisa AGB ayadoo cuskanaysa "hanaanka raad-raaca" ayadoo ku dhufanaysa qarashaadka guud ee daryeelkaas hal iyo bar boqolkiiba qarashaadka guud, oo la yiraahdo "boqoleeyda AGB." Boqoleeyda AGB ayaa la xisaabiyaa sanad kasta ayadoo u qaybisa cadadka buuxa ee dhammaan sheegashooyinka Valley Medical Center & Clinics ee ay ogolaadeen shirkadaha caymisku intii lagu jiray 12 bilood ee lasoo dhaafay wadarta guud ee qarashaadka guud ee la xiriira sheegashooyinkaas. Ujeedooyinkaan awgood, cadadka buuxa ee ay ogoshahay shirkada caymiska ayna ku jiraan labadaba cadadka ay celiso shirkada caymiska iyo cadadka (hadduu jiro) bukaanka/damiinku masuulka ka yahay inuu ku baxsho qaabka qarash wadaaga, qaybta caymiska, ama lacagaha caymisku jarto.

Xisaabinta AGB ayaa la sameeyaa sanad kasta. Marka u qalmidda kaalmada dhaqaalaha la xaqiijiyo, Valley Medical Center & Clinics ayaa ku dabaqi doonta qarash dhaafyada kaalmada dhaqaalaha ayadoo lagu saleynaayo Heerarka Fakhriga ee Federaalka. Haddii baaqiga lagu leeyahay uu ka badan yahay cadadka AGB ee la ogol yahay, qiimo badel dheeraad ah ayaa lagu dabaqi doonaa baaqiga si loo dhimo oo loo gaarsiiyo boqoleeyda AGb.

| Diiwaanka | Isbitaalka iyo Xirfadlayaasha Isku-dhafka ah Qiimaha AGB (dhaqan galaaya 7/1/2022) | Su'aalaha |
|---|---|---|
| **Valley Medical Center & Clinics** | 31% | 425.690.3578 |

Si waafaqsan Sharciga Difaaca Bukaanka iyo Daryeelka Qiimaha Jaban, isbitaallada khayriga ah oo loo aqoonsaday inay yihiin ururada 501(c)(3) (ayna ku jiraan **Valley Medical Center & Clinics**) waa inay ku xadidaan cadadka ay ka qaadaan xaalada degdega ah ama daryeelka caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah ee la siiyo shaqsiyaadka u qalma kaalmada sida ku cad Xeerkaan kaalmada Dhaqaalaha wax aan ka badnayn cadadka caadiyan laga qaado dadka leh caymiska daboolaaya daryeelkaas kamana qaadi karaan "qarashaadka guud" shaqsiyaadkaas. *Eeg* 26 USC §501(r)(5)(A) iyo (B).

Valley Medical Center & Clinics ayaa buuxisa shardigaan ayadoo meesha ka saaraysa dhammaan qarashaadka shaqsiyaadka u qalma kaalmada dhaqaalaha ee xeerkaan. Valley Medical Center & Clinics ayaa siisa xog ku saabsan xeerkaan wakaaladaha maxaliga ah ee khayriga ah iyo kuwa dadwaynaha ee ka shaqeeya baahiyaha caafimaadka bulshooyinka danyarta ah ee deegaankooda.

Waxaa intaas dheer, Valley Medical Center & Clinics ayaa haysa khulaasada luuqada fudud ee xeerkaan, oo lagu heli karo luuqada ay ku hadlaan in badan 5% dadka ama 1,000 kamid ah dadka aaga isbitaalku u adeego. Valley Medical Center & Clinics ayaa bixin doonta nuqullada xeerkaan, khulaasadiisa luuqada fudud, iyo codsiga si bilaash ah oo laga helaayo webseedkeeda, marka la codsado meesha adeegyada caafimaadka lagu baxshay iyo boostada Mareykanka oo ah:Valley Medical Center & Clinics Financial Counseling, 400 South 43rd St., Renton, WA 98055 -5010; (425) 690-3578; (furan Isniin ilaa Jimce, 8:30 a.m. ilaa 5:00 p.m.).